

AF SOOMAALI/SOMALISKA

STOCKHOLM KA CAGAARAN

BAYAANKA
DUURASHADA
2014

miljöpartiet de gröna

STOCKHOLMS STAD



STOCKHOLM 2030

- 150 000 guri oo cusub
- 30 000 guri oo da'yarta iyo ardeyda loogu talo galay
- 3 khad cusub oo tareenka ah
- 7 seero degaanka



BADANKEENU WAXA AAN RABNAA

1. U dhis kuwa mustaqbalka sii waari kara

Waxa loo baahan yahay in Stockholm laga dhiso guryo badan. Waxaanu ilaa sanadka 2030 rabnaa inaanu dhiso 150 000 oo guryo qabcad habaysan oo degaanka aan waxyeelayn oo magaalo isku dhawdhaw oo waarta ku yaal. Halkaas oo meelaha cagaaran la ilaaliyo oo la horumariyo. Sidoo kale waxaanu rabnaa inaanu taagno todoba seerood iyadoo aanu xadiiqadaha magaaladu ay sii jiri doonaan. Waxaanu rabnaa inaanu garoonka diyaaradaha ee Bromma u badalno magalada xadiiqada ee Bromma, oo ay noqoto magaalo ay 50 000 oo guri leh. Ugu yaraan kala badh guryaha la sameeyey waxay ahaan doonaa qaar hadhka la kireysto.


2. U dhisi doona guryo badan dhalinta iyo ardeyda

Waxaanu rabnaa inaanu dhiso guryo yaryar oo jaban oo dhalin

ta iyo ardeyda loogu talo galay. Waxaanu rabnaa inaanu laban laabno sameynta halka qol oo aanu u qoondeyno 30 000 guri dhalinta iyo ardeyda ilaa 2030. Waxaanu xataa rabnaa inaanu isbadel ku sameyno liistada safka guryaha iyadoo aanu sameyndoona suuq gacanta labaad ah oo sugan halkaas oo shirkadaha guryahu ay guryaha ku kireyn doonto gacanta labaad.

3. Aad u dhimis hoy la'aanta

Waxaanu rabnaa inaanu aad u dhiso hoy la'aanta. Carqaladaha ay qaar badan la kulmaan maanta si ay u helaan guri sugan



waa in meesha laga saaraa. Taa-geero la qoondeeyey waa inay jirtaa oo ay helayaan kuwa u baahani. Qoysaska carruurta leh wa inaan guryaha laga caydhin

4. **Ka dhigaaya Stockholm ta hogaanimaysa kala guurka tamarta**

Iyadoo la isticmaalaayo aalada tamarta cadceeda oo saqafka magaalada la saaro iyo tamarta dabeysha ayaa Stockholm ka geyb qaadan doontaa inay dhinto saameynta cimilada iyadoo safka hori ka gali kala guurka tamarta. Warshada tamarta dhuxusha laga dha-liyo ee Värtan ku taala ayaa la baabiin doonaa iyadoo dha-maan waxsosaarka tamartu uu noqon doono mid aan shidaal ka saleysneyn.

5. **Wax ka qabanaaya hawada wasakhda ah ee Stockholm**

Hawada Stockholm waa inay ka fiicnaato. Mamnuucid taayirka musbaarka leh ayaa laga hir galinayaa gudaha magaalada Stockholm iyadoo nadaafada dariiqyada magaalada laga wanaajin doono si ay hawadu uga sii fiicnaato. Si loo dhimo waxay la sii deynaayo ee bartikalada iyo naytarajin dhay-ogsadhka ah ayaanu balaadhinayanaa oo aanu kordhinaynaa kharashka

galida si ay qaar ka badani u door bidaan raacitaanka gaadiidka dadweynaha.

6. **Sii carruurtayada bay'ad aan sun laheyn oo fiican**

Bay'ada shaqada carruurta waa inay ahaato mid sun aan lahayn. Taas micnaheedu waxa weeye in alcaabta, dhulka iyo agabka kale aanay ku jirin wax kimikooyin ah oo dhaawac keeni kara. Goobaha iyo bay'ada ay joogaan waa inay ka qeyb qaadataa caafimaad fiican iyadoo lagu saleynaayo baahida carruurta ee ciyaarta iyo waxbarashada.

7. **Awooda saara cuntada orgaaniga ah ee degaanka lagu sameeyo ee xanaanada iyo dugsigaba.**

Waxaanu doonaynaa inaanu awooda saarno cunto fiican oo si wanaagsan loo kariyey oo tayo fiican leh. Hadafkayagu waxa weeye in 100 kiiba boqol cuntada lagu bixiyo dugsiyada ay ahaato mid orgaanig ah. Dhamaan carruurta waa inay heshaa fursada ay si degan ugu dhameysanayaan xili ku filan oo wakhtiga qadada ah. Waa muhiim in carruurta ay awoodi karto xiliga dugsiiga ee maalin-too dhan.

8. Shaqaaleysiya dugsiga dad badan oo waaweyn

Stockholm waxay u baahan tahay inay shaqaaleysiiso dugsiga dad badan oo waaweyn si ay ardeydu macalinkooda ugu hesho wakhti badan. Si ay dad ka badan u dalbadaan inay macalinnimo ugu shaqeeyaan, baraha khaaska ah iyo barayaasha firaqada Stockholm waxay u baahan tahay in bay'ada la wanaajiyo mushaharkana la kordhiyo. Markaas ayaynu kordhinaynaa ardey kasta kaalmada uu u baahan yahay.

9. Ka wanaajinta caafimaadka ardeyda

In ay ardeydu caafimaad qabto waa mid muhiim ah si ay dugsiga u wataan. Waxa loo baahan yahay kalkaalisooyn dugsiga ah oo badan iyo la taliyeyaal dusiga kuwaas oo la kulmi kara ardeyda iyagoo soo helaaya caafimaad darada dhimirka. Ardeygu waa in uu kalkaalisada dugsiga la kulmi karaa maalin kasta.

10. In carruurta oo dhan helaan iskuul fiican

Faraqa u dhaxeeya dugsiyada Stockholm waa uu sii kordhayaa. Waxaanu u qeybin doonaa waxqabadka sida baahida ku

saleysan si ardeyda loo siiyo fursad isku mid ah oo ay hore ugu maraan dugsiga iyadoo aan loo egeeyn meesha ay maagaalada ka degan yihiin.

11. In kala badh laga dhimo lacagta iskuulka dhaqanka (kulturskolan)

Waxanu rabnaa inaanu balaadhino waxyaalaha kala duwan ee Hidaha iyo dhaqanka ah si ay carruuru badani u helaan. Sidaas daraadeed ayaan u dhimeynaa kala badh kharashka waxqabadka dugsiga Hidaha iyo dhaqanka. Waalidiinta dhaqalahooodu waa inaanu ahaanin mid go'aamiya in uu ardeygu barto sida loo tumo muusiga, sida loo dhaanso ama wax loo jilo.

12. In la sameeyo khad tareen cusub, khadka oranjka, kasoo 300 000 oo dheeraada qaadaya

Waxaanu donaynaa in la galiyo kharashka gaadiidka dadweynaha, iyadoo aan aheyn Förbifart Stockholm ama waxyaalaha kale ee dariiqyada waaweyn ee dhaawacaaya degaanka. Khad cusub oo dhulka hoostiisa mara oo aanu ugu yeedhi doono khadka oranjka ah kaas oo safarka ka dhigi doona mid jaban, ka dhakhso badan iyado uu kor u qaadi



doono awooda khadka dhulka hoostiisa. Khadka oranjka ah waxa uu mari koonfurta Älv-sjö, isagoo sii mari Hornstull iyo Fridhemsplan, ilaa waqooyiga Solna.

13. Kor u qaada socodka gaadiidka dadweynaha

Waxaanu doonaynaa inaanu kor u qaadno basaska bu-luuga ah siday u soo galayaan gudaha magaalada anagoo u sameyn doona dariiq ay iyagu maraan. Waxaanu doonaynaa inaanu ka saarno boqolkiiba shan baarkinka baabuurta iyadoo aanu badalkeeda sameyn doono sagaal kiloomiter oo dariiq basaska ah. Waxa kale oo aanu kor u qaadi sa-farka doomaha.

14. Ka dhiga Stockholm magaalo baaskiil

Waxaanu rabnaa inaanu kor u qaadno meelaha ay baaskiiladu maraan iyadoo

aanu dariiq uga jari doono baabuurta, oo aanu sameyn dariiqyo isku xidhan oo badan oo balaadhan oo sugan ku-waasoo uu baaskiilku maro. Dadka lugta iyo kuwa baaski-ilka wataa maaha inay isku qabsadaan booska. Waxaanu rabaa inaanu awooda saarno dib u habeynta dariiqyada baaskiilka oo aanu dhisno baarkinada baaskiilka iyo gee-rashyadooda.

15. Kor u qaada tayada daryeelka dadka waaweyn

Waxaanu doonaynaa inaanu waxqabad badan galino daryeelka dadka waaweyn. Iyadoo aan loo eegeyn cida qabaneyna ayaa dhamaan daryeelka dadka waaweyn ee adeega guriga iyo hoyga dadka waaweyn ay bixiyaan adeeg tayo wanaagsan. Tayada wanaagsan waxa ka mid ah cunto degaanka lagu sameeyey oo nafaqo leh iyo dibad u saarid maalinkasta ah.

16. Qaar badan oo raba ayaa heli doona boos hoyga dadka waaeyn

Waxqabad la kordhiyey ee daryeelka dadka waaweyn ayaa u suurto galinaysa in qaarka badan ay soo galaan hoyga daryeelka dadka waaweyn iyadoo tayadana kor loo qaadi doono. Dad badan oo waaweyn oo leh baahi weyn ayaa maanta loo diidaa meel inay hoyga degaanka dadka waaweyn ka helaan iyadoo aanu taas rabno inaanu wax ka badalno.

17. Kor u qaada mushaharka shaqooyinka dumarku ku badan yihiin

Dadku waa inay bariiskooda kala soo bixi karaan shaqo, sidaas darteed ayaanu awooda u saareynaa sinaanta iyadoo aanu mushaharkana kor u qaadi doono dadka hela mushaharka ugu yar ee waxqabadka Stockholm.

18. Sameeya Stockholm uga sugan hbt

Dhamaan dadku waa inay dareemaan in lagu soo dhaweeyey Stockholm iyadoo aan loo eegeyn galmadooda, faracooda iyo galmada ay tusayaan. Waxqabadka waa in la galiyo si loo cadeeyo hbt-da dugsiyada

dawlada iyadoo loo sameyn doono goob sugan oo ay ku kulmaan dadka hbt.

19. Awood saara sida looga hor tagaayo cunsuriyada iyo kala takoorida.

Waxaanu rabnaa inaanu adkeyno shaqada ka hortaga midab takoorka, ajanib naceybka ama midab kala sooca iyadoo aan loo eegayn sababta cunsuriyada. Waxaanu doonaynaa inaanu awooda saarno shaqada ka hortaga midab kala sooca anagoo la shageyn doona xafiiska ka hortaga midab kala sooca, ururuda tabarucaadka iyo shaqobixiyayaasha Stockholms. Stockholm waa inay ahaato magaalo dhamaan dadka aqoontooda laga faa'iideysto oo aan cidna la cunsuriyadeyn.

20. Abuurid fursado carruurta oo dhan u helaan carruurnimo ammaan ah

Waxaanu rabnaa inaanu kor u qaadno waxqabadka bulshada ee carruurta iyo dhaliinyarada, oo ay ka mid tahay kordhinta shaqaalaha bulshada iyo kalkaaliyayaasha bannaanka. Carruurta qoysaska mukhaadaraadka qaata ama cudura dhimirka qaba ayaa



heli doona gargaarka iyo caawimada ay u baahan yihiin. Ilmana in la dilo ama la fara xumeeyo maaha.

21. Ka abuurid meelo badan oo magaalada ah xafiis dhexe oo taageera dhalinta bilaa shaqada ah

Waxanu rabnaa inaanu ku soo ururirno waxqabadka hal meel oo aanu bilowno xarunta bilowga ku yaala meelo badan oo Stockholm ah halkaas oo dhalintu ay ka heli doonto sidi ay shaqo ama waxbarasho u heli lahaayeen. Waxa kale oo aanu sameyn doonaa kor u qaadista aqoonta dhalinta bilaa shaqada ah ee aan haysan waxbarashada dugsiga sare.

Qandaraasyaa magaalada waa in loo isticmaalo si loo qaato masuuliyada bulshada iyadoo qandaraaslayaasha ay shaqo siiyaan dadka inta badan bilaa shaqada ahaa.

22. Maalgelin xaafadaha ku hareersan magaalada iyo kuwa miljon programka.

Dhamaan magaaladu waa inay noolaato. Sidaas darteed ayaa loogu baahan yahay istraatajiyad xarunta nool, u dhawaanshaha adeega iyo ahmiyad siinta hidaha iyo dhaqanka iyo isboortiga. Miljonprogrammen waxa uu u baahan yahay in dib u habeyn lagu sameeyo iyadoo dadka ku nool lala shaqeynaayo.

